# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:37 AM** **Hansard No.20/5** **Kal-fadhi 20aad fadhiigsa 16aad**

**Ajendah:-** *Wasiirka Wasaarada Duulista iyo Hawada oo Golaha Wakiilada Warbixin ka siiyay Takaaliif Amniga Madaarada Madaarada Somalialnad oo Golaha Xukuumadu u soo gudbisey.*

**Gudoomiyaha:-**

**Wasiirka W. D iyo Hawada:-**

**Su'aalaha Mudanayaashu weydiiyeen Wasiirka.**

**Md. Maxamud Jaamac Cilmli (Dable):-** Gudoomiye, Mudanayaasha iyo Wasiirka iyo hawlwadeenada la socda waan idin salaamayaa, in yar oo muqadamo aan ka hormariyee, anigu Gudiddii baan ku jirey waana dhameystey waana ka baxey oo wasiirka waan aragney waana is afgaraney nuqdada kaliyee ee meesha taala in waxa la hagaajiyo oo la saxo waa mid waajiba arrinka ugu muhiimsan ee aan ka wada hadalney waxa weeye reerka 10 caruura wata ee $100 dollar halkaa laga qaado Gudahana laga qaadayo $87 laga qaado marka la isugeeyo waa $187 markaa arrin muhiima oo aan idiin sheegayo.

Shir-gudoonka waxaan weydiinayaa, inaga xukuumada waxaa inoo dhexeeya waa mashruuc dawlada ka yimi, mashruuc sharcigaasna maanan arag laman qeybin, halkan waxaanu ku haynaa uun tacriifadihii dawladaha jaarka ah, markaa waa in sharciga lagu noqdaa oo wasiirka iyo shir-gudoonkaba arrinka dastuurka la waafajiyaa oo Golaha la horkeenaa?

***Su'aal 1.*** Mudane Wasiir Qawaaniinta wadanka u yaala takaaliifta iney ururiso waxaa xaq u leh Wasaarada Maaliyada oo qaabilsan, qodobada dastuurka ku qoran mid odhanaya hay'adi gooni ha ururiso ma jirto, miyaaney ahayn in budgetka dawlada lacagtu ku dhacdo ka dibna laguu gooyo?

Waxaana kalo soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye, Arrinkan Guddi farsamo aha loo saaro soo eegta oo naaqishta, waan ka baxey.

**Gudoomiyaha:-** tan hore qabyo qoraalka Xeerka maanta ayaa Golaha la keeney barina waa loo qeybinayaa hadii ilaahay ka dhigo, maantana Su'aalaha

Wasiirka ayaan u deyneynaa, Xeerkuna Goluhu horimanayaa oo ka doodaya, su'aasha wasiirkana isagaan u gudbinayaa.

**Wasiirka:-** wuxuu mahadsan yahay Mudane M J Cilmi, tii hore Gudoomiyahaa ka jawaabey oo anagu waan soo gudbiney Xeerkii, su'aasha labaad maxaa budgetka loogu dariwaayay $10 ayaan u fahmey, horta marka ugu horeysa waxaan moodayay inaan sharaxey sababaha gaar ka dhiga miisaaniyadaha Madaarada, xukuumada dakhliyo badan oo aan ku jirijirin budgetada ayaan ku soo darney iyadoo goluhu nagu canaanan nagu dhaliilin qoraalo iyo resolutions noo soo qorin waayo waxyaabihii aan umada u balan qaadney ayay ka mid ahayd inaanu hantida umada soo ururino, waana waxa Miisaaniyadeena kor u qaadey, waxaa kaloo jira sida hadii aad xeerkan ansixisaan uu muujin doono dakhliyo kale oo hay'ado madax-banaani maamulaan wey jiraan sida dekada oo aan miisaaniyada ku jirin, xeer baana jideeyay aad idinku ansixiseen waxaa la mida Madbacada Qaranka.

Markaa arrintan iyada ah, sababihii lacagtan budgetka loogu dari waayay waxaan moodayay inaan sharaxay ilaa sadexda qodob.

***Gudoomiyaha:-*** Ku soo celi mudane Wasiir iminkana.

**Wasiirka:-** sababaha loogu dari waayay lacagta waa.

- Shaqaalaha ka shaqeeya oo scalekeena shaqaalaha dawlada lagu dari-kari waayay, waayo waa shaqaale ka mushahar badnaanaya shaqaalaheena dawlada waana arrinta ay inaga doonayaan dadkan inaga shaqeeya, waana arrin u baahan inaynu fiiro dheer u yeelano.
- Arrinta kale systemkeena budgetka kuma jirto waxa la yidhaahdo depreciation, ineynu inagu ku darsano soo iibsano mooyane, waana arrimaha qolyan ina caawinayaa inaga doonayaan iyana depreciation system la helo, sidoo kale maintenance waxani waa shaqo maintainance u baahan waxay la mid tahay 3 dollar ee madaarada inaga haysatey ee aad noo ansixiseen, waayo shaqo badan baa ku socota madaarada wayna adag tahay in la yidhaahdo budgetka foojar saddex biloodka ah ha lala sugo, markaa arrintani waa arrin sidaa loo arkey wax kaloo lagu sababeynayaa ma jiraan.

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac:-** Wasiirka Wasaarada duulista, Md. Maxamuud Xaashi, Agaasimaha Guud, Agaasimaha waaxda Duulista, raga ajaanibka ah intuba way salaaman yihiin. Wasiir anigoo shaqadaan qabanaeysaan iyo bilicda Madaarada iyo diyaaradaha aad u tixgalinaya,

hadana waa lagama maarmaan su'aalaha aan qabno in lagu weydiiyo, markaa ha dhibsanin, horta waxaa saxayaa Xildhibaanka qudha ee ka tirsan ee isku ilaawey bastoolada waxaa lagu qabtey laguna xidhey dubia ayaan moodayay hadaanu mid kale jirin magaciisuna Maxamed Cali Jibriil.

Lacagta Qudha ee rakaabka marka laga qaadayo eek u jirta marka laga soo dhoofayo London waxaa 20 oo loo yaqaan airplane tax, lagama yaqaan lacag kale qoladayadaa soo dhoofta mana arag. Intaasi waa hor u dhac.

**Su'aal.**

**S/1.** Wasiirku wuxuu noo sheegay iney qiimeyso bilicda, security iyo handlingka madaarada, Wasiir anagu hadaanu nahay wakiilada dadku soo doortey waxaanu ilaalinaa in cashuurta laga qaadayaa culeys ku keenin dhaqaalohooda iyo noloshooda sida uu qeexayo **Qodobka 14aad** ee Dastuurku sheegayo, markaa Su'aasha aan halkan kaa weydiinayaa waxay tahay Wasiir Miisaniyadii waxay korodhey 17% sanad walbana wey korodhaa, lacago 12 milyan waxaa meel loo dhigey mashaariic horumarineed, markaa inta masaakiinta ee aan waxba haysan aad $10 saareysaan maad miisaaniyada badatey wax ka garaacataan?

**S/2.** wasiir waxaad noo sheegtaa lacagta guud ahaan laga qaado dadka ka soo degay garoomada dayuuradaha markey soo caga dhigtaan iyo markey dhoofayaan iyo wasaaradaha kala qaadaa, sida Wasaarada Maaliyada, intaad idinku qaadaan?

**S/3.** Caalamka iyo wadamada jaarka ah waxaa wax laga qaadaa marka ey soo degayaan oo kaliya, hadhow warqadii markii hore lagaaga qaadey ayaad la tageysaa, Somaliland halkan sidaasey ahaan jirtey, hadaad marka hore ka qaado marka danbena tiraahdo 78 baa lagaa qaadayaa wuu yaabayaa, markaa maaney habooneyn in marka hore laga qaado, ileyn lacagtii ka dhamatey oo la shaxaadey oo wuxuu siteyba ka dhamaateyba?

**S/4.** dadka da'daweyn iyo caruurta under-ageka ah iyo ardeyda jaamacadaha haduu ku tusey percentage baa laga qaadaa dadka waaweyn iyo caruurtana waxba lagama qaado markaa ma ku soo darteen xeerka inaan caruuta iyo dadka waaweyn aan waxba laga qaadin ileyn dadku wax ka dhalmo badane, markaa hadaadan xeerka ku soo darina in caruurta iyo dadkaa waaweyn aan laga qaadin iyo waliba ardeyda?

**S/5.** lacagta $10, tikidhka waxaa ku jira 5% x taxes, waxaa kaloo jira 3 dollar oo aan idiin ansixiney mid parking, markaa hadii aad idinkuna ku sii dartaan tan

dee cidiba ma dhoofi kartee oo tigidhba ma goosan kartee taa ma ka fakarteen Wasiir?

**S/6.** parkingka airportka barbera waxaa ku qoran VIP parking waana meel debada oo fog, VIP waxaa qof muhiima oo Masuula, markaa VIP parking fog oo laga soo lugeynayo 1km ilama qurux badnee taa ma ka fakarteen Mudane Wasiir?

**Jawaab:-**

**Wasiirka:-** Wuxuu Mahadsan yahay Mudane C/raxmaan, waxba dhibsan maayo su'aalaha, waa waxaan halkan u imi, waliba waxaan xildhibaanka ugu darayaa parliamentarian waan ahaan jiroo waan garanayaa protocolka Golaha, waa sixid kale ee xildhibaanka bastoolada lagu qabtey kaa dubia sheegimaayo, waa mid kale oo golaha ka tirsane umana sheegeyn dhaleeceyn dhibta ina haysatey baan tusaaleynayay, su'aalo badana waad isukey daba dhigtee waxaan jeclaa inaad saaxiibadaa qeyb ugu tagto, hadaan isku deyo dulucdooda.

**J/1.** Lacagta **$10** Maxaad Miisaaniyada uga dabooli weydey wey korodhee, Waa dhab Miisaaniyadu way korodhaa, waxaa kaloo dhaba markey korodhona baahiyaheenuna way kordhaan oo labadaa arrimood markasta way is-barbar socdaan, maanta waxaynu ka dhiganahay ninkii dukaanka soo galey ee yidhi maxaa wax xaafadeydu u baahneyd meesha ma yaalaan, markaa taasi wey suurobi weyday, anaga Gudidii Miisaanayadu arrinta waan ka doodney 7 wasiir oo aan ka midnahay baanu ahayn, ugu horeyn waxaanu isla garaney oo meel isla dhigney markii aanu nidaamkii eegney iyo waxaanu sharxeynay in arrintaa sidaa loo daayo mudadaa, laakiin anaguna aan hawshii la eegno ***NAASHA*** oo la xisaabtano oo buugaagta lacagta lagu qabanayo laga diiwaangliyo Xafiiska hawlaha guud iyo kan xisaabiyaha qaranka oo la ogaado lacagta la qaadey intey tahay, markaa runtii sababahaa ayaa looga dabooli kariwaayay.

**J/2.** Lacagaha Madaarada laga qaado ee faahfaahin naga sii xildhibaanu yidhi, waxa weeye $31 marka qofku soo degayo waxaa qaada Wasaarada Maaliyada, $34 baa laga qaadaa, $3 waa tii madaarada, barigii hore Wasaarada Maaliyadu waxay qaadi jirtey $20 bangiguna $30 bu sarifi jirey oo $15 iyagaa qaadan jirey qofkana $15 baa sarifkooda la siin jirey wixii Somali, Qofka Ajaanibka ah $50 buu baanku u sarifi jirey oo $25 ayuu isagu qaadan jirey $25na sarifkooda ayuu siin jirey, marka halkaa systemkii baanu waafajiney, markuu dhoofayo ama baxayo waxaa laga qaadaa $44, $10kan dollar ee NAASHA qaado iyo $34kii markuu soo degey laga qaadey ee $31 Wasaaradu Maalida leh, $3 waa tii madaarada, $1 dheerna stamp duty weeye.

**Md. C/qaadir X. Ismacil Jirde:-**

**Md. Baar Siciid Faarax:-**

**Gudoomiyaha:-**

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ----------------------------------------------------------------- | ---------------------------------------------------------. |